# Halgankii Umadda iyo hagar li'idii Idiris Cismaan Guray.

Ma ogtahay warmoogow
Oogada miliilicay
Hirar iiga muuqdeen
Fadaka bari ka muuqdiyo
Maandeeq hashaydii
Ibtii maraqo gooyaa
Ninka maanta joogow

Xalay baan mirtii dhexe
Bada meersan ee weyn
Miraaliyo gudgude iyo
Mayay roob inuu di'i
Mar labaad inay curan
Lagu maali gaawee
Sharadkaa muxuu yahay

Ma qadaan, Juun1980
Mujaahid Cabdiraxmaan Baqdaadi

April,2012
Mareegta Farshaxan

Dhaco waliba leh xus.Taariikh walibana leh tilmaanteeda.Majaraha bani'aadanku maro ayaa waxaa sargooya waayahay ku xeeran.Ummad kastaa waxay leedahay bilo iyo dharaaro ay si gaar ah u tilmaansato.Bishan April ayaa bulshada reer Soomaaliland ugu suntan qalbiyadooda si gaar ah.Hase yeeshee Maamulkii Afweyne waxay u aheyd bil uu jiritaankeedu dhibi jiray.Waxaa la aasaasey ururka SNM bishii April 6, 1981.Waa sannad-guuraddii 31 ee ka soo wareegtay maalintaa.Waxay bulshada reer Soomaliland guraneysaa midhihii ka dhashay iniintii la beeray maalintaa.

Maamulkii Afweyne ayaa bilawgii u arkayey afar inan oo injir leh,waxay qaban karaana yar tahay.Muddo ka dib aragtidaas ayaa isku rogtay inuu ogolaado jiritaankooda,una hawlgalo siduu ula dagaalami lahaa.Waxaa hababkii kala duwanaa ee dagaalkaasi ka mid ahaa in berkadaha laga sumeeyo,in hormoodka SNM lala beegsado dilal qorshaysan, in maalgaliyaasha ururka heshiis lala galo,iwm.

Aroor ay cadceedu godkeeda ka soo fogaatey ayaa telefoonka Xasan Aadan Gudaal dhacey. Waxaa dhinaca kale ee telefoonka salaan wanaagsan oo beerlaxawsi ku jiro soo fidiyey madaxweynihii dawladihii la isku odhan jiray Soomaliya.Intaa ka dib wuxuu Ina Siyaad Bare u sheegay Xasan Aadan Gudaal inuu fariin ka gaadhsiiyo maalqabeenka reer Kiiniya ee Idiris Cismaan Guray,una sheego inuu diyaar u yahay inuu kula kulmo meel kasta oo uu doorto.Arintii ayaa Xasan ku noqotay ku soo boodo,waxaanu la yaabey mooganaanta xad dhaafka ah ee ka muuqata hadalada Ina Siyaad.

Xasan wuxuu si fudud ugu sheegay inaanu marna Idiris ka laabaneyn go'aankan uu gaadhey iyo hawshan uu gudagaley.Rag waa is-hayaaye muu adkeysto oo tan tu dhaanta

la shir yimaado ayaa dareenka hoosena ku hadaaqayaa. Idiris si cad oo qayaxan ayuu u diiday inuu la kulmo Ina Siyaad Bare. Hase yeeshee Xasan si uu u tuso halka uu Idiris halgankaa ka taagan yahay ayuu ogolaadey inuu kulan ka dhex dhaliyo Safiirkii dawladii Soomaaliya u fadhiyey Kiiniya xilligaa oo ahaa Cabdiraxmaan Xuseen (Cabdiraxmaan Dheere) iyo Idiris Cismaan Guray. Fadhigaasi guul ugumuu dhamaan Afweyne iyo kooxdiisa, Idirisna wuxuu u noqday dardar galin cusub.

"Adeer Idiris gaashaanka ayuu ku dhuftay codsigaa,gogoshaana aniga ayaa u dhigay Idiris iyo Cabdiraxmaan dheere oo safaarada ka socday" ayuu yidhi Xasan Aadan Gudaal. Wuxuu Xasan Aadan Gudaal ka shaqeyn jiray xilligaa Xafiiska UN-ta ee magaalada Nayroobi. Waxaanu Afweyne is lahaa ka faa'iidayso beerlaxawsigii ahaa in qofba qofka ay isku dhaw yihiin loo diro.Hase yeeshee Xasan laftigiisa ayaa kaalin mug leh ka qaadan jiray dhinac dhaqaale ururinta ee ururka SNM iyo kaalmeynta dhaawaca SNM ee lagu hayo Nayroobi.Xidhiidh ku saabsan arintan oo dhex marey dawladihi Kiiniya iyo Soomaaliya ayaa dhawr jeer u keenay in Idiris la xidho tiraba dhawr jeer. Inkastoo markii danbe laysku dayeyba in dil lala beegsado.

Bahda Mareegta Farshaxan ayaa lagu yaqaanaa in maalmahan oo kale ay isbarto dadkii halgankii ummada kaalin muuqata ka geystay iyo bulshada reer Soomaliland.Gu'gan waxay u hawlgaleen inay dhawr qof ku soo qaataan.Qoraalkana waxay si gaar ah ugu hibeeyeen dhamaan dadkii halgankaa kaga qayb qaatey maalkooda,naftooda, garaadkooga,iwm. Waxaana mareegta Farshaxan soo bandhigaysaa taariikh halgameedkii mudane Idiris Cismaan Guray.

Bilawgii 1982 ayaa ciidamdii Afraad oo gundhig u noqday ururka SNM ay talaabeen. Waxaana hogaanka markaa hayey ururkaa mujaahid Maxamed Cali(IHUN),waxaana hogaanka Afraad ka mid ahaa C/kariin Cali Buux, Cabdi Siyaaro,Maxamed Aadan Warsame, Maxamed aadan Cigaal,Cabdi nuur, Maxamed Axmed Bookh,iwm.Waxaa saraakiishii ugu horeysay ee talaabana ay ahaayeen Aadan Shiine (IHUN),Axmed Dhagax (IHUN), Aadan Saleebaan(IHUN), Maxamed Kaahin.Waxaa soo gaadhey magaalada Addis-Ababa kooxihii ugu hroeeyey ee ka soo baqoolay dalalka Carabaha iyo Ingiriiska. "Mana ahayn wax qof walba goonidii ugu dhashay. balse wuxuu ahaa arrin qorsheysan oo uu habeeyey unuggii saraakiisha ee gudaha, kuna gacan qabteen xidhiidhadii kale ee dadweynaha, siyaasiyiinta iyo dhallinyaraba lahaa, ee aan hore u soo sheegayey" ayuu yidhi Ibraahim Maygaag (IHUN)- (Short History of SNM by Ibrahim Maygag,Page4).

Warka ku saabsan arintaa ayaa soo gaadhey xubnihii Afrikada Bari deganaa.Xilli ku beegnayd horaantii bishii Juun,1982 ayuu Idiris u anbabxey magaalo madaxda Itoobiya ee Addis-ababa.Sida qorshihiisu ahaa wuxuu beegsadey hudheelka Hilton. Waxaa halkaa joogay markaa oo uu kula kulmay mudanayaasha ay ka mid ahaayeen Xasan Ciise Jaamac, Maxamed Kaahin,Aadan Shiine(IHUN),Maxamed Cali(IHUN) iyo Axmed Dhagax (IHUN).Idiris waxaa safarkan ku wehelinayey Maxamed Jaamac Nuur (Blaki) iyo Cabdilaahi Cabdi Faroole (Cabdilaahi Dhakaar).Ururkii SSDF ayaa markaa dhaqaale ahaan meel fiican marayey,gawaadhi ahaana haystay kuwa ugu mudan ee markaa dalka

Itoobiya lagu wato,iyagoo waliba hub la taaban karana haystay.Waxaase ka maqnaa maamul wanaag iyo ciidankii hubkan u adeegsan lahaa sababta loo ururshay.

Waxay mudanayaashaasi uga waramеen waftigan culus oo xilli loo baahan yahayna yimid in arintu meel xun mareyso oo dawladii Itoobiya la soo taagan tahay in ay ku biiraan ururkii SSDF. Hormoodkan halgan u soo hayaamey waxaa horyaaley go'aan qaadasho adag. Dawladii Itoobiya waxay ku wargalisay inay ku kaalmeynayso ku biirida ururkii habqanka ahaa ee SSDF.Hormoodkana waxaa u cad in maamulkii Afweyne ee ay qoriga u qaadanayaan iyo ururkaii SSDF inaan wax isbadal ahi u dhaxeyn.Kaalmana way u baahnayeen, taageerana way ka rabaan dawladii Mingiste.

Halgamaagii weynaa ee Ibraahim Maygaag Samater(IHUN) oo arintaa ka hadlaya ayaa qoraal ku xardhay sidan: "Markii saraakiishu tallowday, dowladdii Itoobiya ee markaa jirtay way soo dhoweysay. Waxa ay se ka fileysay inay ku biiraan SSDF oo ahaa ururkii uga horreeyey Itoobiya, taliskii Siyaad Barrena ka horjeeday. Saraakiishii baxday waxay ku wargeliyeen nidaamkii Itoobiya inay ka tirsanyihiin urur kale oo la yidhaa SNM, kuna qanciyeen in madaxdooda siyaasadeed ee London joogta loo gudbiyo fasaxii soo gelitaanka Itoobiya". (Short History of SNM by Ibrahim Maygag,Page4)

Idiris iyo waftiga intiisii kaleba iyagoo kalsooni buuxdii ka muuqato ayey aad u soo dhaweeyeen go'aankii ahaa in gooni loo taagnaado oo SNM ahaan lagu hawlgalo. Wuxuu markaa Idiris furay sanduuqii Baan ee ugu horeeyey ee ay SNM yeelato kuna shubay lacag dhan $20,000 (Labaatan kun oo Doolar).Xasan Aadan Gudaal oo arintaa ka hadlaya ayaa yidhi: "Adeer Idiris wuxuu ahaa dhaqaalihii ugu horeeyey ee ay SNM gacanta ku dhigto markii Itoobiya la yimid ninkii bixiyey,aadna xilligaa baahi buuran ayaa loogu qabey deeqdaa".

Idiris oo isaga laftigiisu ka waramaya arintaa ayaa yidhi: "Waan ku dhiirigaliyey in go'aankaa ah inaan lagu biirin SSDF lagu adkeysto.Ina Cabdi Qaxar (IHUN) ayaa ii hayey lacag, waxaanan u sheegay in $20,000 oo ka mid ah uu ku soo shubo Account-ka aanu u furnay SNM isla xilligaa ee magaalada Addis-Ababa."

Cabdicasiis Maxamed Iid oo aqoon u leh Idiris Cismaan Guray ayaa yidhi "Wuxuu Idiris ahaa qofkii ugu horeeyey ee account-ay SNM yeelato lacag ku shuba". Waftigaasi la mahadiyey waxay ku soo laabteen Magaalada Nayroobi.Waxay markiiba guda galeen ururinta dhaqaalaha,diyaarintii guryo la dhigo dhaawaca SNM, iyo diyaarintii guryo ay madaxda SNM-tu gudo(xarumaha dagaalka) iyo dibadba ku shiraan. Waxaa sidoo kale dhaqdhaqaaq arintan la isleeyahay ku curyaamiya bilaabey maamulkii joogay safaarada Soomaalida oo amarka si toos ah uga qaadanayey Ina Siyaad. Dhib weyn iyo niyad-jab ayey Ina Siyaad ku keentay diidmada uu kala kulmay markuu codsiga u soo bandhigay Idiris,waxaanu uga wareegay inuu xidhiidh la yeesho dawladii Kiiniya.

Waxaa la unkay xubno kala qaabilsan hawlaha kala duwan ee lagu taageerayo ururka SNM. Dhinac isgaadhsiinta iyo raadinta wararka waxaa loo xilsaarey oo kaalin muuqata ka qaatey Khadar Aw Filfil -Khadar yare-(IHUN).Halka dhinaca diyaarinta guryaha ay gacan weyn ka geysteen Maxamed Jaamac Blaki oon gu'gii 2010 taariikh

halgameedkiisa  aan xusnay  iyo Idiris Cismaan Guray.Hawluhu  si habsami leh ayey iskugu dubadhaceen Sahra Maxamed Guuleed oo ka waremayesa ayaa tidhi “runtii xidhiidhka ka dhexeeyey dadkayagii joogay halkaasi aad buu u fiicnaa,hawshana si hakar la’aaneed ayaa loo fulinayey,waxaa sheegis mudan inuu Idiris hormoodka ka mid ahaa”. Sahra waxay u dhaxdey Xasan Aadan Gudaal.

Idiris oo ka sheekaynaya  hawlihii uu Khadar qabaneyey ayaa yidhi: “Wiil dhalinyaro oo aad u firfircoon ayuu ahaa,wuxuu xidhiidh dhaw la yeeshay  idaacaha Reuters, BBC, iwm. Sidoo kale wuxuu  warbixino iswaydaarsan jireen hay’addo dhawr ah sida hay’adii MSF (Medicine sans Frontiere),iwm.Xubnihii SNM-ta ee London iyo Diridhaba joogayna isagay la soo xidhiidhi jireen oo intuu gurigayga fadhiisto ka isticmaali jiray qalabkii isgaadhsiinta eenu halkaa dhignay oo iskugu jiray Foonyo iyo telefoonba”.

Ibraahin Cige  ayaa  ku darey intaasi in illihii dhaqaale iyo isgaadhsiineed ee ururka SNM kaalin muuqata ay ka qaateen kooxihii Afrikada  Bari siiba Kiiniya iyo Tansaaniya. Ibraahin Cige wuxuu ka mid ahaa hormoodkii dhinaca taakulaynta SNM ee wadanka Tansaaniya.

Hawsha ay wadeen si fiican ayey u socotay.hase yeeshee muddo yar ka dib waxaa kooxdan u yimid dhawaaq dhiilo  ah ,aad bayna uga  murugoodeen.Waxaa loo sheegay in odayaashii waayeelka ahaa iyo ganacsadayaashii  la ururiyey laguna guray  jeelka Madheera.Gu’gii 1983 bishii Janaayo horaanteedii ayaa guushii ugu horeysay ee kooxdani ku doogsato  waxay  uga timid markii  ciidamadii Mujaahid Maxamed Diiriye – Lixle-(IHUN)hogaaminayey  furteen jeelka Madheera ayna si nabadqabta  ugu guryo hooyeen odayaashaa  saldhigyadii SNM gacanta ku haysay.Idiris  oo ka hadlaya arintanina wuxuu yidhi:“Odayaashii  waa lala baxey oo ciidan uu hogaaminayo mujaahid Lixle(IHUN) ayaa jabiyey jeelkii Madheera.Waxaanay nabadqab ku gaadheen magaalada Gaashaamo.Waxaa ididiilo hor leh na galiyey guushaa ka soo hoyatey.Waxaana  muddo gaaban gudahooda na soo gaadhey in Birjeexna la jabiyey oo Cabdilaahi Askar(IHUN) la badbaadiyey.hawlgaladani waxay dardar hor leh galiyeen hawlahayagii”

# Idiris iyo SNM :

Idiris wuxuu ka mid yahay hormoodkoodana ku jiraa dadkii tirada yaraa ee  halgankii SNM ku jirtay kaalin mug leh ka geytsay. “Waqtigiisa,kartidiisa, iyo xoolihiisa wuxu  si hagar la’aaneed  ugu deeqay ururkii SNM siduu horumar iyo guul la taaban karo u gaadhi lahaa” ayuu yidhi Xasan Xasan Aadan Gudaal.

Dadaalka  uu Idiris ku muujiyey waxtarka uu u fidiyey ururkii SNM ayaa ahaa mid aan mugdi iyo madmadow qofna ka galayn.Waa sababta uu ina Siyaad  geed dheer iyo ku gaabanba u koray si uu gacanta ugu dhigo Idiris.Waxaanu Ina Siyaad aaminsanaa  inuu Idiris yahay  mid ka mid lafdhabarta SNM,haddii ay  gargaar ka helaan iyo dabacsanaana ay SNM  ku noqonayso dhabarjab weyn oo aanay ka soo kabaneyn.

"Dhamaan bulshada reer Soomaliland ee degan Kiiniya iyo Tansaaniya umay kala hadhin kaalmeyntii iyo gargaar u fidintii SNM,hase yeeshee dhaqaalaha ugu badan wuxuu ka iman jiray Idiris "ayuu yidhi Zakariye oo xilliyada halganka socdaal ku joogay dalalkaa Kiiniya iyo Tansaaniya.Zakariye oo hadalka sii wata ayaa yidhi: " waxyaalaha kale ee Idiris ku tilmaanaa waxaa ka mid ahaa inuu galab walba u iman jiray dhaawaca aadna uga war hayey"..

Waxaa kaloo kaalintooda dhaqaale ama taageero kaleba oo ay fidiyeen muuqatey Maxamed Jaamac Blaki,Xaaji Baaruud Cige(IHUN),Cabdiraxmaan Gadhyare, Ibraahin Cige, Xasan Aadan Gudaal, iyo xaaskiisa Sahra Maxamed Guuleed,X.Cali Nuur Cawaale iyo Xaaskiisa Maryan Dhicis, Aamina Maxamed Guuleed,Cali Madoobe, Cali Cuucuule(IHUN),Maxamed Cali ,Khadar Aw Filfil (IHUN),Cabdilaahi Dhakaar (IHUN),Dulliye sare Siciid Cali Xasan,iwm.

## Hawlgaladii Kiiniya:

Wadanka Kiiniya siiba magaalada Nayroobi ayaa waxaa ku nool dad fara badan oo ka soo jeeda wadankii Soomaaliland ee ku biiray wadanka Soomaaliya.Markii lagu dhawaaqey ururka SNM dareen hor leh ayaa ka bilaabmey magalaada Nayroobi. Dadkani waxay istuseen in halgankan ay qayb ka mid ah yihiin loona baahan yahay inay ka qayb qaataan.Halgankaa siyaabo kala duwan ayaa looga qayb qaatey.Kooxdani waxay kaalintoda ku muujiyeen inay hanti, talowadaag , iyo kolba wixii muuqda kaga ku kaalmeeyaan koboca iyo guuleysiga ururka SNM.

Waxaa aynu halkan ku soo qaadan doona dhawr qaybood oo ka mid ah siday uga qayb qaateen ,inaggoo xoogga saareyna kaalinta Idiris kaga beegnayd.

## I-Kaalmeynta Dhaawaca:

Dhaawaca ururka SNM ayaa meelo dhawr ah lagu daweyn jiray.Nayroobi ayaa ka mdi aheyd goobaha la keeni jiray.Dhaawaca Nayroobi ayaa u badnaa jajabka.Sidaa darteed ayaa guryaha la dhigi jiray waxaa ka mid ahaa guri uu u kireeyey Idiris oo ku yaalay xaafada kariyooki(karaoke) .Dadkaa waxaa u xilsaarnaa dhakhaatiir uu Idiris siin jiray gunadooda.Idiris oo arintaa ka hadlaya ayaa yidhi: "Waxaan shaqaaleey laba dhakhtar oo midna Talyaani ahaa,ka kalena ahaa Pakistaan.waxay had iyo jeer daweyn jireen dhaawacaa".

## II-Daryeelida hormoodkii:

Hormoodkii SNM ayaa marmarka qaarkood u yara baahnaa nasasho,iyagoo dhinaca kalena wada baraarujin.Waxay u socdaali jireen jireen meelo badan oo aduunka ka mid ah.Idiris oo ka hadlaya arintaa mar kale yidhi: "waxaa halkan yimid oo dagey gurigayga ku yaala Parkland hormoodka ay ka mid ahaayeen Laba Quwaadle, Maxamed Ibraahin warsame (Hadraawi), Xasan Ciise jaamac,Daa'uud Kheyre, iwm".

## III-Shirarkii SNM iyo baahintii :

Waxaa lagu qaban jiray shirar badan goobo kala duwan oo ka mid ah daafaha aduunyada.Nayroobi-na waxay ka mid aheyd goobahaa loo suntadey in shirarka dhaqaale ururinta,baraarujinta, talwadaaga,iwm.Tilmaan gaar ah waxaa lahaa in warqadii dhagarta (Letter of Death) ee gacan ku dhiigle Morgan qoray lagu soo bandhigay Wargeyskii “New African” ee soo baxey July 14,1987.

Qoraalkaa waxaa wargeysa u gudbiyey mudane Richard Greenfield.Goobjooge ayaa mareegta farshaxan uga waramey arintaa isagoo yidhi: “waxaanu is baranay Richard Greenfield.Waxaananu iska wareysaney dagaaladii SNM-ta iyo halkay marayaan. Markaan ayaan u sheegay in ay hormoodkii SNM la shirayaan hormoodka degan Nayroobi.Sidaasaan ku keenay gurigii markaa la fadhiyey oo uu lahaa duuliye sare saddex xiddigle Siciid Cali Xasan. Waxaana halkaa maalintaa fadhiyey Maxamed Blaki,Idiris Cismaan,Maxamed Ibraahin Hadraawi,Ina Quule, Daa’uud Kheyre,Robert Micahel Mariam,iwm”.

Maalintaa Maxamed Ibraahin Hadraawi wuxuu ku daahfuray maansadiisii “Sirta Nolosha”.Waxaa maalintaa u suurtogashey in Richard Greenfield uu gacanta ku dhigo warbixino badan sida warqadaa dhagarta.

Waxaa kaloo shirar kala duwan lagu galay guryaha Maxamed Blacki iyo Idiris Cismaan.Guriga uu galayey Idiris ee ku yaalay xaafada Parkland ayaa kaalin mug leh ka galay hawlahaasi, halka guriga uu Idiris ku lahaa xaafada Kareoki uu kaalin weyn ka galay daaweynta iyo buuleynta dhaawacii SNM.

## IV-Kulanadii Madaxda SNM:

Waxaa Idiris u suurtoagshey inaanu ku koobnaan bixinta maalka uun ee talo iyo tusaalena ku yeesho hawlihii SNM-ta.Wuxuu Idiris in badan u baqoolay xarumihii SNM-ta.Wuxuu Idiris goobjoog ka noqday go’aamo badan oo SNM gaadhey kuna hawlgaleen.Waxaa Idiris qayb laxaad leh ka qaatey furitaankii saldhigyadii Ramaso iyo ......Kulano Idiris kala duwan ayuu la yeeshay madaxdii SNM qaarkood,waxaanaynu ka soo qaadi karnaa tusaale ahaan kuwan:

### -Idiris iyo Cabdiqaadir Koosaar(IHUN):

Mujaahid Cabdiqaadir Koosaar (IHUN)wuxuu xilka gudoomiyenimada hayey mudadii u dhaxeysay Bishii Noofember 1983 ilaa Bishii Ogoosto 1984.Muddada u haystay Cabdiqaadir gudoomiyenimada SNM-ta waxaa suurtogashey in hawlo badani hirgalaan ,sidoo kale ayaa ciidamada SNM-na heleen qorigii Nuur Madoobe.

Idiris ayaa u baqoolay dhinacaa Addis-aba sidii u caadada aheyd markuu dhoofiyo xoolaha.Wuxuu Idiris kulan la yeeshay Cabdiqaadir Koosaar kalana hadley arintii

markaa laga wada hadlayey ee aheyd sidii loo balaadhin lahaa xarumaha ururka.Idiris oo arintaa ka hadlaya ayaa yidhi: “Waxaan ku idhi Mujaahid Cabdiqaadir Baabuli kama xoreyn kartaan  dalkii ee maad ciidamada xuduuda meel u dhaw dajisanaa”

Furitaankii xarumaha Awaare iyo Ramaso ayuu  Idiris  gacan weyn ka geystay dhaqaalihii ku baxey.Tani waxay suurtogalisay inay u dhawaato ardeydii soo talaabeysay iyo dadkii reer miyiga ahaa ee ku soo birrayey ururka.Idiris oo ka hadlaya  soo dhawaansha  meelahani ayaa yidhi: “Ramaso waxay xadka u jirtaa 40 km, Awaarena waxay Ramaso  u jirtaa 40km, waana  masaafad socodkana u fudud,dalkiina u aad ugu dhaw”.

Cabdiqaadir Koosaar  wuxuu aad u jeclaa ee lagu yaqaanaa weedho badan oo ay ka mid tahay “SNM baan ka mid ahey mucaaridna waan ku ahey waa laba aan isqaban”.Waa weedh ay dadweynaha reer Soomaliland maanta wax ku qaadna karaan.Mabda’a Soomaliland-nimadu waa geed ka go’an aan  marna lagu khaldi karin mucaarid ku noqoshada dawlada.

## -Idiris iyo Axmed Maxamed Siilaanyo:

Gu’gii 1984 horaantiisii ayuu Idiris  hawlo ganacsi ugu  sugnaa wadanka Giriiga.Idiris ayaa  dhawaaq  dheer  oo telefoon wadey soo gaadhey.Idiris wuxuu ka warqabey in shir waynihii ururka SNM uu qabsoomi doona ,waqtigiina  is riixayo.Waxaa kaloo wadanka soo gaadhey Ibraahim Maygaag (IHUN) oo ka soo baqoolay  dhinacaa Mareykanka una xadhko xidhnaa  ka qaybgalka shirkaa.Sidoo kale ayaa waxaa deganaa cariga Ingiriiska kuna joogay magangalyo siyaasadeed  Axmed Maxamed Siilaanyo oo iminka ah madaxweynaha  wadanka Soomaaliland.

Gu’gii 1982 ayaa Axmed Maxamed Siilaanyo isagoo  idaacada BBC-da uga waramaya sababta uu u joogay halkaa  yidhi: “ Waxaa aan samaynayo maanan goosan,waxaanse goostay inaanan dalkii ku noqon,istiqaaladeydiina aan dhiibo,laajinimana aan dalbado, Waxaa aanu yeelano ama aan yeelayo aan ku tashanayaana waa wax ii furan oo aan isleeyahay markii ay muuqato ama ay soo baxdo wixii igula haboon  een is leeyahay sida fiican eed ummadu ugu adeegi karto aan ugu adeego”..

Idiris wuxuu ku khasbanaadey inuu safarkiisii ganacsi ee uu ku joogay cariga Giriiga soo gaabiyo.Waxaanu marka Idiris u soo baqoolay wadanka Ingiriiska.Idiris oo ka hadlaya sababta socdaalkiisa Ingiriiska ayaa yidhi: “Bishii Janaayo 1984 waxaa ila soo hadlay hormoodkii SNM ee gudaha joogay sida Xasan Ciise Jaamac iyo gudoomiyihii ururka oo ahaa Cabdiqaadir Koosaar .Waxay igu wargeliyeen inaan u tago Axmed Maxamed Siilaanyo iyo Ibraahim Maygaag”.

Ibraahim Maygaag(IHUN)  wuxuu markaa  ka soo baqoolayey dhinacaa Maraykanka, una sii jeeday  ka qaybgalka shirweynaha uruka ee lagu qabaneyey bisha Ogoosto 1984 magaalada Jigjiga ee cariga Itoobiya.Axmed maxamed Siilaanyo hawlo yaryar ayaa

markaa aan u diyaar aheyn,hase yeeshee kulankani wxuu kaalin weyn ka qaatey inuu ka qaybgalo shirkii 1984 ee loona doortay inuu noqdo gudoomiyaha ururka SNM.

Idiris oo hadalka sii wata ayaa yidhi: “Anigoo maraya magaalada Viena (cariga Ostariya) ayaan la hadlay Siilaanyo iyo Ibraahin Maygaag una sheegay inaan ku soo degayo Churchil Hotel,halkaana uu kulnakayagu ka dhacayo,gurigaygii waayeel ka tirsanaa ururka SNM ayaa deganaa markaa”.

Gu’gii 1978 ayuu Idiris guri ka iibsadey degaanada ugu qaalisan ee magaalada London.waa degaanka la yidhaa St.John’s Wood.Sida laga soo xigtay mareegta WikiPedia,waxaa wargeyska Forbes ku qiimeeyey guryaha degaankaa in lagu iibsan karo ilaa 2 Malyuun oo Gini sannadkii 2007.Gurigaa Idiris xilligaa wuxuu siistay ilaa hal Milyan iyo shan boqol oo gini.Waxay xaafadan jaar yihin xaafadaha Maida,Vale, Primrose Hill iyo Marylebone.Gurigani wuxuu saldhig u noqday hormood badan oo SNM-ta ku jiray, hawlana ka wadey cariga Ingiriiska.Waxaa had iyo jeer uu u furnaa in odayaasha iyo wafdiyada kale ee hawlaha SNM-ta ku jiraan degaan,ku shiraan, iwm.

Intaanu Idiris ka soo anbabixin dalkii Kiiniya,wuxuu ka qayb qaatey soo anbabixintii labada Cali (IHUN)si ay uga qaybgalaan shirkii 1984 ee SNM-ta.Idiris oo arintaa ka hadlayan wuxuu yidhi: “Cali Wardhiigley iyo Cali Hiraabena waxaanu ka dirnay Nayroobi. Labaduba baasaboor may haysan waxaan u dhiibay inan la odhan jiray Niki oo ka soo jeeday dalkii Giriiga inuu soo diyaariyo,Waxaanu u diray sawiradii iyo magacyadoodii Mikal Maryama oo Saambiya safiir ka ahaa”.

Maadaama uu Maykal Maryama dawladii Afweyna u shaqeynayey waxa la qarinayey xidhiidhka uu la yeelanayo dadka taageera ururkii SNM.Sidaasuu Niki oon laga shakiyeynin ula xidhiidhay.

Xilli ay ku beegnayd 1985 ayaa Siilaanyo la soo hadley Idiris una sheegay in uu dhaqaale ururin u sameeyo ururka. Idiris wuxu tagey maglaada Jidda ee cariga Sucuudiga. Idiris wuxu la kulmay jaaliyadii reer Soomaliland ee halkaa deganeyd una sheegay in kulan dhaqaale ururina uu abaabulayo laguna qabanayo hudheelka Al-Axmar.

Kulankaa waxaa iskugu yimid dad tiro leh.Kharashka hudheelka iyo qabanqaabada kulankuna waxaa xil qaadey Idiris.Waxaa habeenkaa Idiris hudheelkii ku yeeshay oo uu bixiyey lacag dhan 10,000 oo Riyaal.Hase yeeshee waxaa kulankaa laga aururiyey lacag kor u dhaaftey 550,000 oo Riyaal.

## -Idiris iyo Cabdiraxmaan Axmed Tuur(IHUN):

Bishii Diisamber 30,1990 ayaa weerar lagu soo qaadey magaalada Balli-gubadle oo aheyd saldhigii SNM.Dhacdadaasi waxay aheyd dhiirigalin weyn.Warkaa ayaa soo gaadhey magaaladda Nayroobi. Idiris oo ka hadlaya arintaa ayaa yidhi” Dhacdadaa dadku dhibaato ayey u arkayeen ee anigu waxaan u arkayey guul iyo baraarujin u soo hoyatey ururkii SNM. maalinta loo yaabo ayaa laga yaabaa ayaan waligay odhan jiray,

sidaasoo kale ayaan idhi maalintii ay Mingiste iyo Ina Siyaad Barre ku heshiinayeen Jabuuti".

waxaa markaa la gudo galay sameyntii gudiyadii kala duwaneyd ee dhaqaale ururinta ilaa la hirgaliyey in dadkii qaxootiga qoys kasta laga jaro in go'an.Sidoo kale ayaa kooxihii Afrikada Bari iyo Carabuhuna u halgaleen dhaqaale ururin guud. Idirisna kaalintiisii dhaqaale muu hakran,shirarkii gudahana wuu tagey.

-1991 bishii 2 ,24dii ayuu ila soo hadlayaa Cabdiraxmaan tuur .Iina heegay in aniga, Cabdilaahi Askar oo xoghayaha gaashaandhiga iyo isaga uu na casuumay Mingiste. Wuxuu Mingiste yidhi sannadkani waxaan filayaa inuu sannadkii yahay rebels ..ee laba baadhis ayaa jira oo dalkayagu ku hawlgalo (Internal and external research).ee xidhiidhka labada dal idinkuna dhiniciina ka ilaaliya,annaguna dawlad kastaa labadaa ayey raaceysaa ee ogaada".

## -Idiris iyo Maxamed X.Ibraahim Cigaal(IHUN)

Mudadii talada loo dhiibay maamulkii SNM ayaa soo gabogabowdey.Sidaa darteed ayaa bulshada degan wadanka Soomaliland go'aan ku gaadhey inay shirweyne guud yeeshaan. Shirkaa waxaa loo qoondeeyey inuu ka dhaco magaalada Boorama ee gobolka Awdal. Shirkaasi wuxuu socday muddo saddex bilood ah. Waxaa shirkaa madaxweyne loogu doortay Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal,halka madaxweyne ku xigeen loo doortay mujaahid Cabdiraxmaan Aw Cali.

Madaxweynihii Kiiniya ee Moi ayaa aragti ka dawuan tiisii hore ku eegay General Caydiid una tirinayey siduu xoogagii Maraykanka uga saarey dalka.Waxaanu jeclaystay inuu la kulmo,sidoo kale ayuu Idiris oo horaantii dawlada Kiiniya indho dheeraada ku eegi jirtay soo dhaweyn helay ka dib guushii SNM soo hoysay.

Idiris ayaa laga codsadey inuu kulan ka dhexeysiiyo Moi iyo Caydiid.Tani waxay u aheyd Idiris fursad qaali ah oo Somaliland ka faa'iidaysan karto.Waxaanu u sheegay inuu Caydiid ilaa bilawgii taageerada hagar la'aaneed ka helayey SNM oo iminka ah Somaliland.Idiris oo arintaa k ahadlayana wuxuu yidhi: "Gu'gii 1994 madaxweyne Moi ayaa igu yidhi kulan qaban qaabi isaga iyo Caydiid ah.Waxaan u sheegay in aaney suurtogal aheyn inuu la kulmo Caydiid,iyadoo aanu joogin hogaamiyihii Caydiid oo ah madaxweynaha Soomaliland Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal.labadaa midna ka kale muu ogayn ilaa ay ku kulmeen guriga madaxtooyada.Maalintaa Cigaal waxaan la wadaagey sheekadii na dhex martey Mingiste".

Kulankaasi guul ayuu ugu dhamaadey saddexda dhinacba.Caydiid iyo Cigaal xidhiidh fiican ayaa u kaaboqaadey.Idiris oo ka hadlaya ujeedada uuka lahaa kulankaasina wuxuu yidhi: "Ujeedada aan ka lahaa waxay aheyd in ay istaageeraan oo go'itaanka Somaliland-na ay fududaato,waxaa kaloo aan u jeeday in aduunku arko madaxweynihii Soomaliland oo dibada maraya ".

Wargeysyada  iyo fogaal-aragyada ayaa aad u baahiyey dhacdadani. Waxaa kale oo Idiris u suurtogashey inuu kaalin ka qaato in uu Madaxweyne Cigaal (IHUN) u kal agoosho Kenya-Ugandha-Ereteriya-Diridhaba-Addis-ababa .

Duqa magaalada Nayroobi xilligaa waxaa ahaa  Steve Mwangi oo xidhiidh wanaagsan la lahaa taageerayaasah SNM,si laxaad lehna wax ula qabtey.Maalintaa waxaa uu Steve  u dhiibay furihii magaalada Nayroobi Madaxweyne Cigaal.Waxaaney aheyd dhacdo ugub ah oo wargeysyadu aad u faaqideen.

## Mastaafurintii  Idiris:

Dagaalkii xukuumadii Afweyne wuxuu u gudbay inuu si toos ah u adeegsado xubno dawlada Kiiniya ka tirsanaa oo beerlaxawsi reereed uu la galay.Waxaase dagaalkaas sii xoojiyey awoodna u yeelay markuu Afweyne si toos ah ula xidhiidhay Madaxweyne Moi una sheegay in Kiiniya laga duminayo dawlada Afweyne, uu isaguna u hawlgali doono siduu Kiiniya uga dumin lahaa dhinaca Soomaaliya.Tani waxay dareen adag galisay Moi oo go’aansadey inuu  dgageysto xubnihii  dawladiisa ka tirsanaa ee beerjileeca u muujinayey Afweyne.

Waxaana Idiris xadhig lala beegsadey  dhawr jeer, inkastoo kii ugu danbeeyey ee dabayaaqadii bishii Juun,1989 ay xubnahaasi go’aansadeen inay Idiris  diyaarad u saaraan Muuqdisho si qoorta loogu dheereeyo.Idiris waxaa aroornimadaa  loo qaadey madaarka Nayroobi,looguna talo galay in la saaro Kenyan Airways oo tageysay magalaada Muqdisho.Waxaa la wargaliyey badbaado ahaana safiirkii Itoobiya ee Kiiniya oo ku soo socday madaarka.

Maxamed Cali Warsame oo aqoon u lahaa sharciga diyaaradaha ayaa ka mid ahaa dadkii ka qayb qaatey in Idiris  la kaalmeeyo,waxaanu yidhi isagoo ka waramaya airntaa: “Waxay aheyd maalin Axada juun 1989 ,waxay damceen inay xoog ku saaraan, waxaa la doonayey in isaga gacanta  laga saaro Siyaad Barre.Markaa Siyaad Bare ayaa dawlada Kiiniya aad uga cawdey  dagaalka SNM ee halkan laga wado.Waxaa markaa furnaa albaabkii Airport-ka Waxaa aniga iyo Ismaaciil Muuse,Cabdilaahi Dhakaar,iyo Blaki aanu u baxney dusha ,arganayna Idiris oo markaa diyaarada agteeda lagu hayo lana leeyahay fuul.Idiris markaa wuu diidsanaa inuu diyaarada fuulo annaguna halkaa dushaanu ka qaylinaynay dhawr goor baanu ku nidhi ha yeelin inaad diyaaradaa fuusho.dabadeed iyagoo halkaa ku haya ayaan anigu hoos u dhaadhacey oon u  tagay Hormoodkii Diyaaradii Itoobiya (Ethiopian Airlines) una sheegay in kaptanka diyaarada Kiiniya ee doonaya inuu Idiris diyaarada xoog ku saaro  ka soo horjeedo sharcigii caalamiga ah”.

Arintu markay halkaa mareyso waxaa ku soo aadan  madaarka safiirka Itoobiya u fadhiya dalkaa Kiiniya oo u socda si uu Idiris uga badbaadiyo tagista Soomaliya.Waxaan cidna ka qarsoonayn in Idiris loo wado dil toogasho ah.Sidaa darteed ayaa dhamaan dadweynihii reer Soomaliland u hawlgaleen in la badbaadiyo Idiris. Waxaanay kaalmo iyo taageero ka

raadsadeen saaxiibadoodii reer Kiiniya ee maamulka ku jiray oo si dadban ula hawlgalayey.

Aan ku noqono Maxamed Cali oo hadalkii sii wada: “Markuu Hormoodkii diyaarada Itoobiya ila gartey,ayuu u tagey hormoodkii diyaarada Kiiniya kuna yidhi waxan aad samaynayso sharci maaha ninkan ma qasbi kareysid xoogna kuma galin kareysid diyaarada, Kaptankii markaa wuu baqey nimankii nabadgalyada (Airport Security) ee dawlada Kiiniya u shaqeynayey ayuu u sheegay. Ciidankii nabadgalyaduna waxay isku dayeen inay xoog ku saaraan hase yeeshee Idiris wuxuuu muujiyey diidmo adag, safiirkii Itoobiyana wuu soo gaadhey oo hawsha ayuu sii fududeeyey waxaanay soo gaadhey xillligii diyaaradu baxeysay. Markaasaa Idiris dib loo soo celiyey.Markii danbe Ilaahay ayaa ka badbaadiyey tagistii Xamar ,. Maalin labaadii ayaa Idiris galay Addis-ababa ilaa intuu ka soo noqonayey”.

Ilaahay muu ogolaan in Idiris uu Afweyne gacantiisa galo.Idiris wuxuu tagey Addis-Ababa , soo dhaweyn fiicana ka helay xubnihi SNM ee marka horeba xidhiidhka la lahaa.guul baaney ku dhamaatey.Waxaana in la tilmaamo u baahan in Madaxweyne Moi uu si ka duwan sidaa ula dhaqmi jiray markuu Idiris soo noqdey.Moi wuxuu dareemay dabkii lagu huriyey Afweyne inuu ku dhamaadey in Afweyne oo firxadii soo galo Nayroobi.Waxaa maanka dadweynaha ku soo dhacaya sawir gacmeedkii Amiir Caamir uu xilligaa sameeyey ee Afweyne oo baalashle ah una sheegaya dadka “sidan maan aheyn ee dantaa i badey”.

# Waa kuma Idiris:



Cismaan Xasan Iiman Cige (IHUN) wuxuu ka mid ahaa dadkii deganaa Ingiriiska,hase yeeshee soo guryo noqday markii xoriyada la qaatey.Cismaan Xasan wuxuu ku magac dheeraa Cismaan Guray.Cismaan wuxuu magalaada Hargeysa ka bilaabey ganacsi.Gu’gii 1945 ayaa Cismaan Guray iyo Caasha Cali Hayaan wiil u dhashay.Waxaanay labadaa waalid ugu wanqaleen wiilkaa magaca Idiris.Wuxuu Idiris la dhashay saddex hablood iyo saddex wiil oo kala ah Fatxiya,Samsam,Khartuum, Mowliid, Shaafici,iyo Muxuyadiin.

Korsiimada Idiris waxaa kaalin mug leh ka soo qaatey abtigii Cabdi Cali hayaan oo yaraantiisii uu la joogay.Idiris wuxuu dugsiga Quraanka,dugsiga hoose iyo ka dhexeba ku qaatey magaalada Waamba ee Riji Village.Hase yeeshee dabayaaqadii dugsigiisii sare ayuu go’aansadey inuu xoogsi tago.Wuxuu Idiris la hawlgaley isago dhalinyaro ah si fiicana u gacan qabtey ganacsatadii Afrikada Bari joogay ee ka soo jeeday dalka

Soomaliland sida Xaaji Baaruud Cige(IHUN),Maxamed Ismaaciil,Cabdiraxmaan Gadhyare.

Ganacsiga wuxu Idiris ka bilaabey suuqgeynta xoolaha nool.Markii uu Idiris muddo wadey ganacsigaana wuxuu ku soo kordhiyey suuqgeynta dahabka iyo dhagax qaaliga ah (Precious stones).Marka laga waramayo taariikhda dahab dhoofinta ee dalka Kiiniya, Idiris ayaa loo tiriyaa inuu ahaa qofkii ugu horeeyey ee Kiiniya dahab ka dhoofiya.

Marka laga tago kooxdan kasoo jeeday dalka Soomaliland,Idiris wuxuu kaloo ganacsi ahaan kula hawlagalay koox Hindi iyo Reer Yurub isugu jirtay.Idiris wuxuu lahaa shirkada Saudia Livestock Agency.Idiris oo hawlahaa ka hadlayana wuxuu yidhi: " Markaan ka dhoofiyo Mombasa ,waxaan u diri jiray magaalooyinka Mokha oo ka tirsan wadanka Yemen iyo Baxreyn .Mokha wuxuu u socon jiray 9 cisho, Baxreyna wuxuu u socon jiray 11 cisho.Bishiiba hal markab yaan dirir jiray.Markuu baxana waxaan u kicitmi jiray dhinacaa Itoobiya si aan hawlaha halganka uga qayb qaato".

Idiris wuxuu dhalay lix caruur ah oo kala ah Iimaan, Yaasiin,Saynab, Nasma,Hibaaq, iyo Kariima. Idiris oo faahfaahinaya dhalashada caruurtiisa qaarkood ayaa yidhi: "Habeenkaanu wada fadhinay Madaxweyne Moi, General Caydiid, iyo Madaxweyne Cigaal ayuu subannimadiina dhashay inankayga Yaasiin.,sidoo kale ayaa inantayda Hibaaqa dhalatey subaxii aanu wada fadhinay aniga,Ibraahin Maygaaga, Siilaanyo".

Idiris waa ganacsade degan magaalada Nayroobi.Waxaa guul lagu riyaaqo u ah in la hadhsanayo geedkii ku baxey halgankuu ka qayb qaatey. Taladu marba qofka si bay ula eegtahayee maanta waa Soomalilander ku faraxsan guulaha la taaban karo ee wadankaasi gaadhey.

Gunaanad:
Halgankii SNM wuxuu dhinbiil ay huriyeen dad huray inta mudan ee ay ugu horeeyaan naf iyo maalba.Qorista taariikhdoodu waa qayb ka mid ah qorista taariikhda wadanka Soomaliland.Wadanka Soomaliland ayaa waxaa ku wada nool bulsho colaad laysku galiyey,dagaalkii SNM wuxuu ka soo horjeeday nidaamkii Afweyne hogaanka u hayey ee dalna baabi'iyey iyo dadna gumaadey.


## Mahadnaq:
Waxaa suurtogaliyey hawshan Jamaal Cali Xuseen ,Ibraahim Cige, Maxamed Cali Warsame, Fu,aad Qawdhan oo wareysiga Idiris iyo faaladaba ka qayb qaatey.Wuxuu wareysigu dhacey bishii Juun 27 ,2011,kana dhacey magaalada Nayroobi.Waxaa kaloo mahadnaq mudan dhamana dadkii ka qayb galay wareysiyada ku saabsan Idiris ee si hagar la,aaneed noola shaqeeyey.

## Tixraac:

1-Culture and Customs of Somalia
By Mohamed Diriye Abdullahi

2-Wareysi Xasan Aadan Gudaal
Warqaade: Bahda Mareegta Farshaxan

3- Wareysi Idiris Cismaan guray
Warqaade: Bahda Mareegta Farshaxan

4- Wareysi Xasan Aadan Gudaal
Warqaade: Bahda Mareegta Farshaxan

5- Wareysi Sahra maxamed Guuleed
Warqaade: Bahda Mareegta Farshaxan

6- Qoraal : Short History of SNM
By: Ibraahim Maygaag Samater (IHUN)

7- Qoraal: Halgankii ummadda iyo
Halyey Mujaahid Aadan Sheekh Maxamed

8- Mareegaha Farshaxan, Hadhwanaagnews, GabileyNews, OodweyneNews,
TogaHerer.

Qalinkiii iyo Tifatirkii:
Fu,aad Sh.

Bahda Mareegta Farshaxan
www.Farshaxan.com ama www.Farshaxan.org